DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
XAFIISKA
GARYAQAANKA GUUD

ولاية بونت لاند
الصومالية
مكتب
المحامي العام للدولة

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE SOLICITOR GENERAL

SANADKA 26AAD	CADADKA 9AAD	TAARIIKH: 1/9/26	Lam. 06

FAAFINTA RASMIGA AH
OFFICIAL GAZETTE
الجريدة الرسمية

Ansixinta wax–ka–bedelka Sharciga Ururada iyo Xisbiyada Siyaasada Dowladda Puntland

TUSMADA	
Qeybta 1aad	*Xeerarka Baarlamaanka iyo Heshiisyada Caalamiga ah* **Ansixinta wax–ka–bedelka Sharciga Ururada iyo Xisbiyada Siyaasada Dowladda Puntland**
Qeybta 2aad	*Xeerarka iyo Digreetooyinka Madaxweynaha.* *WAXBA MALEH*
Qeybta 3aad	*Xeer Nidaamiyeyaasha Wasaaradaha, Xeerarka Goleyaasha Deegaanka iyo Barnaamijyada Dowladda.* *WAXBA MALEH*
Qeybta 4aad	Go'aanmada Maamulada iyo Qaraarada Maxkamadaha. WAXBA MALEH
Qeybta 5aad	Amarada, Ogeysiisyada iyo Qandaraasyada Dowladda. WAXBA MALEH

DOWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA

XAFIISKA
MADAXWEYNAHA

ولاية بونت لاند
الصومالية

مكتـب
الـرئيـس

PUNTLAND STATE OF SOMALIA
OFFICE OF THE PRESIDENT

Sharci Lr. 004 ee 1-da September 2026, kuna saabsan Ansixinta wax-ka-bedelka Sharciga Ururadda iyo Xisbiyadda Siyaasadda.

Madaxweynaha Dowladda Puntland

Markuu arkay: Dastuurka Dowladda Puntland Qodobkiisa 80-aad farqadiisa 16-aad.

Markuu arkay: Ansixinta Golaha Wakiilada Dowladda Puntland ee Summadeedu tahay XGGW/DPL/32/2025, kuna taariikhaysan 4-tii August 2026.

Markuu Tixgeliyey: Baahida loo qabo Ansixinta Sharciga Ururadda iyo Xisbiyadda Siyaasadda Dowladda Puntland.

Wuxuu soo saaray

Sharciga soo socda:

Qodobka 1aad

Golaha Wakiiladu waxay ansixiyeen Sharciga Ururadda iyo Xisbiyadda Siyaasadda Dowladda Puntland.

Qodobka 2aad

Nuqulada asalka ah (Original) waxaa lagu kala kaydinayaa Xafiiska Madaxweynaha, Xafiiska Xoghayaha Guud ee Baarlamaanka iyo Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda.

Qodobka 3aad

Dhaqangalka Sharcigani wuxuu noqonayaa markuu Madaxweynuhu saxiixo laguna soo saaro faafinta rasmiga ah ee Dowladda Puntland.

Siciid Cabdullaahi Deni
Madaxweynaha Dawladda Puntland

Office of the President
Puntland State of Somalia

Tell: +252-090-6809612; E-mail: dg.oop@plstate.so, oop@plstate.so; Website: www.plstate.so

DAWLADDA PUNTLAND
EE SOOMAALIYA
GOLAHA WAKIILLADA

ولاية بو نت لاند الصومال
مجلس النواب

Xafiiska Guddoomiyaha
Office of the Speaker

Tix:-XGGW/DPL/32/2026 **Garoowe, Axad** **Taariikh: - 04/08/2026**

Ku:- Madaxweynaha Dawladda Puntand **Garoowe**

Ujeeddo:-Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda Puntland

Mudane Madaxweyne,
GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADU: -

MARKUU ARKAY:- Qodobada **60-aad (1), 64-aad (1), 68-aad(t)** iyo **70-aad (1)** ee Dastuurka Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY:- Qodobadda **2-aad (1), 3-aad (1), 57-aad(2)** iyo **58-aad** ee Xeer-hoosaadka Golaha Wakiillada Dawladda Puntland.

MARKUU ARKAY:- Soo gudbinta Madaxweynaha Ref: MW/DPS/135/2026 ee June 21, 2026, kuna saabsan wax-ka-beddelka Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda Dawladda Puntland.

MARKUU TIX-GELIYEY: - Baahida loo qabo Wax-ka-beddelka Iyo Kaabista Xeerka Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda Dawladda Puntland.

MARKUU DHEGEYSTEY: - Dooddii iyo Go'aankii Golaha Wakiilladu kalfadhiga 58-aad, Fadhigiisii 18-aad ee 23.07.2026 cod gacanta tag ah ku Ansixiyeen wax-ka-beddelka Xeerka Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda Dawladda Puntland. Guntanka fadhiga oo ahaa (**37**) Mudane, waxaa ugu codeeyey oggol (**33**) Mudane, Diidmo (**2**) Mudane, halka ay ka aamuseen (**2**) Mudane.

WUXUU GUDDOOMIYEY:-

Ansixinta Wax-ka-beddelka Xeerka Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda Dawladda Puntland.

Wada Shaqeyn Wacan

Md. Cabdirisaaq Axmed Siciid
Guddoomiyaha Golaha Wakiillada DPL.

XAFIISKA GUDDOOMIYAHA GOLAHA WAKIILLADA DAWLADDA PUNTLAND
OFFICE OF THE SPEAKER OF PUNTLAND STATE HOUSE OF REPRESENTATIVES



DAWLADDA PUNTLAND EE SOOMAALIYA

GOLAHA WAKIILLADA PUNTLAND

WAX-KA-BEDDELKA XEERKA URURRADA IYO XISBIYADA SIYAASADDA DAWLADDA PUNTLAND

Luulyo, 2026

TUSMO

..... 1

CUTUBKA 1-AAD 1

HORDHAC 1

Qodobka 1-aad 1

Magaca Xeerka 1

Qodobka 2-aad 1

Erey Bixin 1

Qodobka 3-aad 3

Ujeeddada Xeerka 3

Qodobka 4-aad 3

Mabaadi'da Xeerka 3

CUTUBKA 2-AAD 3

DIIWAAN-GELINTA URURRADA SIYAASADDA 3

Qodobka 5-aad 3

Furashada Urur Siyaasadeed Cusub 3

Qodobka 6-aad 4

Shuruudaha Diiwaangelinta Urur Siyaasadeed 4

Qodobka 7-aad 4

Habraaca Qabashada Codsiyada Diiwaangellinta Ururrada 4

Qodobka 8-aad 5

Shuruudaha kala Reebista Ururrada Haysta Oggolaanshaha 5

Ku-meelgaarka ah 5

Qodobka 9-aad 5

Habraaca Hubinta In Ururradu Buuxiyeen Shuruudaha 5

Qodobka 10-aad 6

Shahaado siinta Ururrada 6

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 11-aad 6
Xubnaha Ka Reebban Ka Mid Noqoshada iyo Isu Sharrixidda Xilalka Ururrada/Xisbiyada Siyaasadda 6
Qodobka 12-aad 6
Waajibaadka Ururada Haysta Shahaadada 6
Qodobka 13-aad 7
Isku biirista Ururrada/xisbiyada 7
Qodobka 14-aad 7
Isbahaysi 7
CUTUBKA 3-AAD 8
DOORASHADA URURRADA IYO XISBIYADA SIYAASADEED 8
Qodobka 15-aad 8
Qabashada Tartanka Doorashada 8
Qodobka 16-aad 8
Qaadashada Ruqsadda Xisbinimo 8
Qodobka 17-aad 9
Ururka/Xisbiga Tartamay ee u Gudbi-waaya Xisbi 9
CUTUBKA 4-AAD 9
QODOBADA HAGAYA URURRADA IYO XISBIYADA SIYAASADDA 9
Qodobka 18-aad 9
Diiwaanka Ururka/xisbiga 9
Qodobka 19-aad 10
Sababaha Lagu Waayi Karo Xubinnimada Urur/xisbi 10
Qodobka 20-aad 10
Mas'uuliyadaha Ururrada/Xisbiyada 10
Qodobka 21-aad 11
Waxyaabaha ka Reebban Ururrada/Xisbiyada 11
Qodobka 22-aad 12
Xuquuqaha Ururrada/Xisbiyada Siyaasadeed 12
Qodobka 23-aad 12

XAFIISKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Waxyaabaha Xisbi ku Burburi Karo 12
Qodobka 24-aad 13
Warbaahinta Ururrada/Xisbiyada 13
CUTUBKA 5-AAD 13
MAALGALINTA IYO XISAABAADKA URURRADA IYO XISBIYADA 13
Qodobka 25-aad 13
Hantida Ururka/Xisbiga 13
Qodobka 26-aad 14
Waxyaabaha ka Reebban Adeegsiga Deeqaha iyo Hantida Ururka/Xisbiga 14
Qodobka 27-aad 14
Qoondada Miisaaniyadeed ee Xisbiyada 14
Qodobka 28-aad 14
Xisaab-xirka Ururka/Xisbiga 14
CUTUBKA 6-AAD 15
XEER-HOOSAADKA URURRADA/XISBIYADA SIYAASADDA 15
Qodobka 29-aad 15
Xeer-hoosaadka iyo Qaab-dhismeedka 15
Ururrada/Xisbiyada Siyaasadda 15
Qodobka 30-aad 15
Shirweynaha Ururrada/Xisbiyada 15
Qodobka 31-aad 16
Shirarka Golaha Dhexe ee Ururrada/Xisbiyada 16
Qodobka 32-aad 17
Hoggaanka Urur/xisbi Siyaasadeed 17
Qodobka 33-aad 17
Isbeddelka Hoggaanka iyo Shuruucda Ururka/Xisbiga 17
Qodobka 34-aad 17
Barnaamijka Siyaasadeed ee Ururka/Xisbiga 17
Qodobka 35-aad 18

GARYAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Astaamaha iyo Magacyada 18
CUTUBKA 7-AAD 18
XALLINTA KHILAAFAADKA 18
Qodobka 36-aad 18
Xallinta Khilaafaadka 18
Qodobka 37-aad 19
Habraaca iyo Ganaaxyada Xeerka 19
Qodobka 38-aad 19
Xeer-nidaamiyeyaal 19
Qodobka 39-aad 20
Burin 20
Qodobka 40-aad 20
Dhaqan-galka Xeerka 20

CARIGAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

CUTUBKA 1-AAD
HORDHAC

Qodobka 1-aad
Magaca Xeerka

Xeerkan waxaa lagu magacaabaa Xeerka Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda ee Puntland.

Qodobka 2-aad
Erey Bixin

Xeerkan gudihiisa haddii aan si kale loo fasirin, ereyada soo socda waxaa micnahoodu noqonayaa sidan: -

No	Erayga	Macnaha
1.	Dawladda	Waxaa loola jeedaa Dawladda Puntland ee Soomaaliyeed.
2.	Dastuur	Waxaa loola jeedaa Dastuurka Dawladda Puntland.
3.	Guddi	Waxaa loola jeedaa Guddiga Madaxa bannaan ee Doorashooyinka Dawladda Puntland.
4.	Doorasho	Waxaa loola jeedaa Doorashada codka ah oo lagu doorto qof ama ka badan oo murashaxiin ah si ay u buuxiyaan xafiisyada ay ka mid yihiin, Madaxtooyadda, Golaha Wakiillada iyo Golaha Deegaanka.
5.	Gobol/Degmo	Waxaa loola jeedaa Gobollada iyo Degmooyinka Puntland.
6.	Xisbi/Xisbiyo	Waxaa loola jeedaa Xisbi/ Xisbiyo buuxiyey inay ka qayb-qaataan doorashooyinka, kuwaasoo la siiyey Ruqsadda Xisbinimo, isla markaana leh jiritaan Qaanuuni ah si waafaqsan Dastuurka Dawladda Puntland.
7.	Urur Siyaasadeed	Waxaa loola jeedaa Urur ay ku midoobeen muwaadiniin wadaaga mabda', himilo iyo barnaamij siyaasadeed, kana diiwaangashan Guddiga Doorashooyinka, ujeeddadiisuna tahay ka-qaybgalka doorashooyinka ururrada

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

		siyaasadeed si uu ugu soo baxo xisbi siyaasadeed.
8.	Warbaahinta Dawladda	Waxaa loola jeedaa Idaacadaha, Wargeysyada, Taleefishinka Dawladda iyo nooc kasta oo kale oo warbaahineed oo ay Dawladdu maamusho.
9.	Dhaqaale	Waxaa loola jeedaa Dhaqaalaha Urur ama Xisbi uu ka helo illo sharci ah.
10.	Hantida Dawladda	Waxaa loola jeedaa hanti kasta oo ay Dawladdu leedahay oo ay ku jirto hantida guurtada iyo ma-guurtada.
11.	Arjiga Codsiga	Waxaa loola jeeda qoraal gaar ah oo uu diyaariyay Guddiga Doorashooyinka oo qeexaya shuruudaha laga rabo in uu buuxiyo Urur siyaasadeed kasta oo is diiwaan-gelinaya.
12.	Hoggaanka Urur/xisbi	Waxaa loola jeedaa hoggaanka sare ee Urur/xisbi oo ah Guddoomiyaha, Guddoomiye ku xigeennada, Xoghayaha Guud iyo ku xigeenkiisa.
13.	Isbahaysi	Waxaa loola jeedaa in labo Urur/xisbi iyo ka badanba ay yeeshaan isbahaysi ku meel- gaar ah si ay u heelaan guul tartan siyaasadeed.
14.	Shirweyne	Waxaa loola jeedaa Kulanka ugu sarreeya ee go'aan-qaadashada Urur/xisbiga, kana kooban ergooyinka ama xubnaha uu xeer-hoosaadka Ururku/xisbigu qeexayo.
15.	Xeer-hoosaad	Waxaa loola jeedaa xeer u gaar ah oo uu samaynayo Urur/xisbi, isla markaana uu ku dhaqmayo qodobadiisa.

Qodobka 3-aad
Ujeeddada Xeerka

Ujeeddooyinka guud ee xeerkani waa: -

1. In la xoojiyo hannaanka xisbiyada badan iyo ka qaybgalka muwaadiniinta geeddi-socodka doorashooyinka.
2. In la xaqiijiyo hufnaanta iyo isla-xisaabtanka maamul ee hawlaha Ururrada/xisbiyada siyaasadeed.
3. In la dejiyo xuquuqaha, waajibaadka iyo habraacyada khuseeya Ururrada/xisbiyada siyaasadeed.
4. In la dhiirrigeliyo tartan siyaasadeed xor ah, caddaalad ah, nabdoon, kaasoo lagu salaysanayo ku dhaqanka xeerkan iyo qawaaniinta kale ee Puntland.
5. In la xoojiyo doorka Guddiga Doorashooyinka ee la xiriira kormeerka iyo fulinta Xeerka.

Qodobka 4-aad
Mabaadi'da Xeerka

Mabaadi'da hagaysa xeerkani waa; -

1. Ku dhaqanka Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka kale ee Puntland.
2. Kor u qaadidda xorriyadda Ururrada iyo Xisbiyada siyaasadeed.
3. Ilaalinta sinnaanta, caddaalada iyo fursadaha isu dheellitiran ee ka dhex jira Ururrada iyo Xisbiyada siyaasadeed.

CUTUBKA 2-AAD
DIIWAAN-GELINTA URURRADA SIYAASADDA

Qodobka 5-aad
Furashada Urur Siyaasadeed Cusub

1. Shantii (5) sanaba mar ayaa la furayaa urur siyaasadeed cusub si waafaqsan Xeerkan.
2. Muwaadiniintu waxay xaq u leeyihiin inay isu abaabulaan Ururo siyaasadeed si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerkan.
3. Qabashada codsiyada diiwaan-gellinta Ururradu waa hal (1) sano ka hor taariikhda ay dhacayso ruqsadda xisbiyadu.
4. Guddiga ayaa shaacinaya wakhtiga furashada Ururro siyaasadeed ugu yaraan hal (1) bil ka hor xilliga lagu sheegay farqadda 3-aad ee qodobkan.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

5. Urur/xisbina kama qayb geli karo doorashooyin haddii aanu sharciyayn Guddiga Doorashooyinka Puntland, sida uu qabo Dastuurka Dawladda Puntland.

Qodobka 6-aad
Shuruudaha Diiwaangelinta Urur Siyaasadeed

1. Urur kasta oo doonaya in loo diiwaangeliyo urur siyaasadeed waa inuu ku soo qoraa arji loogu tala galay, kuna soo hagaajiyaa Guddiga Doorashada Puntland isagoo arjiga ku lifaaqaya caddaymaha iyo qoraalada hoos ku qoran; -
   b. Goortii iyo goobtii Ururku ku qabtay shirkii aasaaska Ururka ee ugu horreeyey.
   t. Liiska magacyada aasaasayaasha Ururka iyo liiska Guddiga Fulinta ee ku meel gaarka ah, isla markaana Golaha Dhexe ee Ururka waxaa lagu dooranayaa shirweynaha ugu horreeya ee ururka.
   j. Qaab-dhismeedka Ururka oo ay ku caddahay magaca Ururka oo dhammaystiran iyo habka uu u qormayo marka la soo gaabiyo, calaamadaha Ururka iyo hal-ku-dhigyadiisa.
   x. Urur kasta waa inuu Guddiga u keeno saddex (3) nuqul oo daabacan oo ah xeer-hoosaadyada Ururka iyo Barnaamijkiisa Siyaasadeed.
   kh. Urur kasta waa inuu keenaa caddeyn bixinta khidmad dhan shan kun oo dollar ($ 5,000) ama shilin somali u dhigma taasoo aan celis lahayn, Lacagta khidmada ah waa dakhli dawladeed, waxaana lagu shubayaa Bangiga dhexe ee Dawladda Puntland.
   d. Lacagta diiwaangelinta waxaa laga bixinayaa xisaabta Ururka, waana in aysan bixin hal gacan ama qof, waxaana hubinaya Guddiga Doorashooyinka.

Qodobka 7-aad
Habraaca Qabashada Codsiyada Diiwaangellinta Ururrada

1. Guddiga Doorashooyinku wuxuu ku baahinayaa warbaahinta Dawladda Puntland bilowga muddada qabashada codsiyada diiwaangelinta Ururrada siyaasadeed, dhammaadka qabashada codsiyada diiwaangelinta, ciwaannada lagu soo hagaajinayo ee xarumaha Gobollada iyo Degmooyinka Puntland.
2. Muddada qabashada codsiyada diiwaangellintu waa soddon (30) maalmood gudahood oo ka bilaabanaysa maalinta Guddigu ku baahiyo warbaahinta Dawladda qabashada codsiyada.
3. Muddada ku cad faqradda 2-aad ee qodobkan waa in Urur kastaa ku soo buuxiyo shuruudaha ku qoran qodobka 6-aad ee Xeerkan.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

4. Markay dhammaato muddada qabashada arjiyada Ururradu, Guddigu wuxuu muddo soddon (30) maalmood gudohood ah ku hubinayaa Ururada buuxiyay shuruudihii looga baahnaa, wuxuuna siinayaa oggolaansho ku meelgaar ah.

Qodobka 8-aad
Shuruudaha kala Reebista Ururrada Haysta Oggolaanshaha Ku-meelgaarka ah

1. Ururrada buuxiya shuruudaha ku xusan qodobka 6-aad ee Xeerkan oo la siiyey oggolaanshaha ku meel gaarka ah si waafaqsan qodobka 7-aad ee Xeerkan, waxaa waajib ku ah inuu u soo gudbiyo Guddiga: -
   b. Qabashadii shirweynaha ee Ururka, meeshii uu ku qabtey iyo taariikhduu qabsoomay oo maqal iyo muuqaal ah.
   t. Liiska magacyada xubnaha Golaha dhexe, Golaha Fulinta iyo magacyada Hoggaanka Ururka.
   j. Saddex (3) nuqul oo daabacan iyo hal (1) nuqul oo danabaysan oo ah Xeer-hoosaadka Ururka ee lagu ansixiyey shirweynaha.
   x. Caddeynta in Ururkaasi ku leeyahay xafiisyo hawlgal ah ugu yaraan lix (6) Gobol, ayna uga diiwaan gashan yihiin gobolkiiba shan boqol (500) oo cod-bixiye.
   kh. Xafiisyada uu ku leeyahay Gobollada iyo Degmooyinka.
2. Muddada ururku ku qabanayo hawlaha ku xusan faqradda 1-aad ee qodobkan waa lixdan (60) maalmood gudohood oo ka bilaabmaysa taariikhda Guddigu siiyey oggolaanshaha ku meel gaarka ah.

Qodobka 9-aad
Habraaca Hubinta In Ururradu Buuxiyeen Shuruudaha

1. Guddigu wuxuu hubinayaa in urur kasta buuxiyey shuruudaha ku cad qodobka 8-aad ee Xeerkan.
2. Guddigu waa inuu hubiyo saxnaanshaha xubnaha shanta boqol (500) ee cod bixiye ee ku cad qodobka 8-aad, farqadda 1-aad xarafka (X) ee Xeerkan.
3. Guddigu wuxuu qaadi karaa tallaabo kasta oo aan ka hor-imaanayn xeerkan ama xeer kale oo dhaqan-gal ah oo uu ku hubinayo in urur kastaa buuxiyey shuruudaha ku cad qodobka 8-aad ee Xeerkan.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA FUNTAAD
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 10-aad
Shahaado siinta Ururrada

1. Guddigu markuu derso caddaymaha ku xusan qodobka 8-aad ee Xeerkan wuxuu go'aan ka gaarayaa: -
   b. Ururrada buuxiyay shuruudaha.
   t. Ururrada ku guuldaraystay inay buuxiyaan shuruudaha.
2. Markuu soo saaro go'aanka ku xusan faqradda 1-aad ee qodobkan, Guddigu wuxuu: -
   b. Ku qorayaa diiwaanka Ururrada buuxiyay shuruudaha;
   t. Ku soo saarayaa go'aan Guddi kuna baahinayaan warbaahinta, Ururrada buuxiyey shuruudaha.
   J. Siinayaa shahaadada Ururrada shuruudaha buuxiyey si ay ugu hawlgalaan inta laga gaarayo doorashada Golaha Deegaanka.

Qodobka 11-aad
Xubnaha Ka Reebban Ka Mid Noqoshada iyo Isu Sharrixidda Xilalka Ururrada/Xisbiyada Siyaasadda

1. Si loo ilaaliyo dhex-dhexaadnimada, madax-bannaanida iyo hufnaanta hay'adaha dawladda, shakhsiyaadka hoos ku qoran waxaa ka reebban inay xubin ka noqdaan urur ama xisbi siyaasadeed inta ay hayaan xilalkooda: -
   b. Ciidamada Qalabka Sida.
   t. Garsoorayaasha Maxkamadaha Puntland.
2. Hawlwadeennada dawladdu isma sharrixi karaan, haddii aanay iska casilin xilalka ay hayaan, Xeerka doorashooyinka ayaa sheegaya wakhtiga kama dambaysta ah ee ay tahay inay is casilaan, haddii ay doonayaan inay tartanka doorashooyinka ka qayb galaan.

Qodobka 12-aad
Waajibaadka Ururada Haysta Shahaadada

Ururrada la siiyey oggolaanshaha ka-qaybgalka doorashadu waa in ay ku baahiyaan barnaamij-kooda siyaasadeed warbaahinta ka hawlgasha Puntland si waafaqsan Xeerka Warbaahinta Puntland.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 13-aad
Isku biirista Ururrada/xisbiyada

1. Ururrada diiwaangashan iyo xisbiyadu waa isku biiri karaan afar (4) bilood ka hor taariikhda doorashadu dhacayso.
2. Ururrada/xisbiyada isku biiray waa inay u soo gudbiyaan Guddiga Doorashooyinka heshiiska isku biirista oo ay ansixiyeen Golayaasha Dhexe ee Ururrada/xisbiyada isku-biiray.
3. Ururrada isku biira waxay yeelan karaan magaca iyo astaanta mid ka mid ah Ururrada isku biiray ama waxa ay samaysan karaan magac iyo astaan cusub oo ka duwan magacyada ururrada kale.
4. Haddii urur iyo xisbi isku biirayaan, waxa la qaadanayaa magaca iyo astaanta xisbiga.
5. Guddiga Doorashooyinku waa inuu baahiyaa markuu hubiyo in isku biiristu u dhacday sifo waafaqsan Xeerkan, inta aan la gaarin taariikhda doorashadu ku muddaysan tahay saddex (3) bilood ka hor.
6. Guddiga Doorashooyinku wuxuu siinayaa shahaaddada isku-biirista ururrada isku biiray haddii ay la baxaan magac cusub.
7. Haddii xubin la doortay sida Madaxweynaha, Madaxweyne ku xigeenka, Guddoomiye, Guddoomiye ku xigeen, Xildhibaan ama xubin gole deegaan aysan rabbin in ay xubin ka noqoto Ururka/xisbiga cusub kadib markii ay midoobeen, waxay sii haynaysaa xilka loo doortay muddada ka harsan.

Qodobka 14-aad
Isbahaysi

1. Ururrada/xisbiyadu waxay geli karaan heshiis isbahaysi siyaasadeed doorashada ka hor waana in heshiiska lagu qoro diiwaanka Ururka/ Xisbiga oo la saxiixo.
2. Heshiiska isbahaysiga ee Ururrada/xisbiyadu galaan Doorashada ka hor waa in loo gudbiyo Guddiga Doorashooyinka Puntland laba (2) Bilood ka hor Doorashada.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

CUTUBKA 3-AAD
DOORASHADA URURRADA IYO XISBIYADA SIYAASADEED

Qodobka 15-aad
Qabashada Tartanka Doorashada

1. Guddiga Doorashooyinka markuu siiyo shahaaddada Ururrada u gudbay inay ka qayb galaan Doorashooyinka sida ku cad Xeerkan, waa inay uga qayb qaataan Doorashada Goleyaasha Deegaanka si waafaqsan Xeerka Doorashooyinka.
2. Ka hor qabashada doorashada lagu sheegay faqradda 1-aad ee qodobkan, Guddiga Doorashooyinku waa inuu cayimaa muddada doorashada la qabanayo si waafaqsan Xeerka Doorashooyinka.

Qodobka 16-aad
Qaadashada Ruqsadda Xisbinimo

1. Doorashooyinka xiga ee xisbiyadu waxay noqonayaan shantii (5) sano mar, waxaana xisbi rasmi ah noqonaya urur siyaasadeedka hela boqolkiiba shan (5%) tirada guud ee codbixiyayaasha golayaasha deegaanka Puntland.
2. Guddiga Doorashooyinku wuxuu Maxkamadda sare u gudbinayaa natiijada kama dambaysta ah ee doorashada Goleyaasha Deegaanka, si ay ugu dhawaaqdo natiijada kama dambaysta ah.
3. Ruqsadda xisbinimo waa shan (5) sannadood oo ka bilaabata taariikhda Guddigu bixiyey ruqsadda.
4. Xisbiyada guuleystay ee loo aqoonsado xisbiyo waxay leeyihiin shakhsiyad Qaanuuni ah iyo hab-maamuus sare.
5. Si waafaqsan Dastuurka, xisbiyada guuleystay waxay ahaanayaan xisbiyo ilaa inta ay ka dhacayso doorasho ay ku soo baxayaan xisbiyadii beddeli lahaa si waafaqsan qodobada Xeerka Doorashooyinka.
6. Xisbiyada ruqsadda xisbinimo qaata, muddada xeerkan lagu sheegay ee ruqsaddooda lagu cayimay waxay xaq u leeyihiin inay ka qayb-galaan doorasho kasta oo Puntland ka dhacaysa muddadaas, iyadoon loo eegayn muddada dhicitaanka ruqsadda uga harsan.
7. Urur siyaasadeedka loo ansixiyo Xisbi, waa inay xeerkiisa ku caddaataa inaan laga saari karin/eryi karin xisbiga xubin ama xubno loo doortey goleyaasha sharciga ah haddii aanay ka hor imaanayn Dastuurka, Xeerarka Dawladda iyo Xeerka Xisbiga.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 17-aad
Ururka/Xisbiga Tartamay ee u Gudbi-waaya Xisbi

1. Urur/xisbi kasta oo ku guulaysan waaya doorashada loogu tartamayo xisbinimadda si waafaqsan Xeerka Doorashooyinka, waxaa u bannaan inay ku biiraan xisbiyada soo baxay kay doonaan.
2. Ururka/xisbiga dhaca/guuleysan-waaya, malahan wax shakhsiyad qaanuuni ah islamarkaana ma hawlgeli karo.
3. Haddii xubin la doortay sida Madaxweynaha, Madaxweyne ku-xigeenka, Xildhibaan ama xubin gole deegaan, ururkiisa/xisbigiisu ku dhaco tartanka Ururrada iyo Xisbiyada waxaa xubintu ku biiri kartaa xisbiga ay doorato, wuxuuna dhammaysanayaa muddo xileedka u harsan.
4. Haddii ay dhacdo xaaladda lagu sheegay faqradda 3-aad ee qodobkan, Madaxweynaha iyo ku xigeenkiisa, waxaa ka reebban inay laba xisbi oo kala duwan galaan, balse waxaa waajib ku ah in ay hal xisbi si wada jir ah u doortaan oo ay ka mid noqdaan.

CUTUBKA 4-AAD
QODOBADA HAGAYA URURRADA IYO XISBIYADA SIYAASADDA

Qodobka 18-aad
Diiwaanka Ururka/xisbiga

1. Urur/xisbi kasta waa inuu yeeshaa diiwaan u gaar ah oo lagu qoro xogta xubnaha Ururka/xisbiga, kaasoo ay ku caddahay magaca oo afran, laanta uu ka diiwaangashan yahay, lambarkiisa gaarka ah iyo sawirka qofka ee cabbirka Baasaboorka.
2. Diiwaanka xubnaha Ururka/xisbiga ee ku xusan qodobkan waa in Urur iyo xisbi kasta u gudbiyo Guddiga Doorashooyinka.
3. Isbeddel kasta oo ku yimaada diiwaanka xubnaha oo ay ka mid yihiin ka bixitaanka ama ku biiritaanka xubnaha, waa in lagu wargeliyaa Guddiga Doorashooyinka si loo diiwaangeliyo loona cusboonaysiiyo xogta.
4. Guddiga Doorashooyinku waa inuu haystaa diiwaanka xubnaha Urur/xisbi kasta, isla markaana uu kaydiyo dhammaan xogaha lagama maarmaanka ah, isagoo si joogto ah u cusboonaysiinaya wixii ku soo kordha ama isbeddel ku yimaada xogta diiwaankaas.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 19-aad
Sababaha Lagu Waayi Karo Xubinnimada Urur/xisbi

1. Xubin ka tirsan urur ama xisbi siyaasadeed waxay xubinimadeeda ku waayi kartaa xaaladaha soo socda: -
   b. Haddii xubintu geeriyooto.
   t. Haddii xubintu si cad ugu gudbiso Ururka/xisbiga is-casilaad qoraal ah, lagana aqbalo.
   j. Haddii xubintu samaysato/ ku biirto/ ka qayb-qaadato aasaasidda Urur/xisbi ama u ololayso Urur/xisbi siyaasadeed kale.
   x. Haddii xubintu ku xadgudubto Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerka u yaalla Ururka/xisbiga, iyadoo xadgudub kaasi yahay mid uu xeerka Ururku/xisbigu si cad u qeexayo in lagu waayi karo xubinnimada, isla markaana looga saaro hannaan waafaqsan xeerka Ururka/xisbiga u degsan.
2. Habka looga saaraayo waxaa lagu faah-faahin doonaa xeer hoosaadka u yaalla Ururka/xisbiga, waana in aanu xeer hoosaadka Ururku/xisbigu ka hor imaan Dastuurka, xeerka iyo habraacyada doorashooyinka u gaarka ah.
3. Xubinta laga saaro Urur/xisbi ee cabasho ka qabta qaabka looga saaray waxa ay cabasho u gudbisanaysaa Guddiga Doorashooyinka oo ay waajib ku tahay inay dhegaysataan cabashada, jawaab celinta kadibna ay go'aan ka soo saaraan.
4. Go'aanka Guddiga waxa rafcaan looga qaadan karaa Maxkamadda awoodda u leh, go'aanka Maxkamaddu gaarto wuxuu noqon doonaa go'aanka kama dambaysta ah ee dacwaddaasi.

Qodobka 20-aad
Mas'uuliyadaha Ururrada/Xisbiyada

Urur/ Xisbi siyaasadeed kasta waa inuu barnaamijkiisa siyaasadeed ku caddeeyo qorshayaashan: -

1. Ilaalinta iyo u hoggaansanaanta Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo xeerarka kale ee Puntland.
2. Ka shaqaynta horumarinta dimuqraadiyadda, nabadda iyo xasilloonida bulshada.
3. Inuu si xor ah oo caddaalad ah uga qayb qaato doorashooyinka, kuna tartamo hab waafaqsan shuruucda Puntland.
4. Dhowrista midnimada bulshada iyo ka fogaanshaha qabyaaladda.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

5. Yeelashada hannaan maamul oo isla xisaabtan iyo hufnaan leh oo ku saabsan dhaqaalaha iyo hawlaha ururka/xisbiga.
6. Wacyigelinta shacabka iyo kor u qaadidda ka qaybgalka muwaadiniinta ee geeddi socodka dimuqraadiyadda.
7. Ixtiraamka xuquuqda iyo xorriyadaha aasaasiga ah ee muwaadiniinta.
8. Dhiirri-gelinta in dhallinyarada, Dadka Baahiyaha Gaarka ah Qaba, Haweenka iyo Dabaqadaha kala duwan ee bulshadu ka qayb qaataan siyaasadda Puntland.

Qodobka 21-aad
Waxyaabaha ka Reebban Ururrada/Xisbiyada

1. Waxaa ka reebban Urur/xisbi kasta inuu u soo gudbiyo Guddiga warbixin been ah ama khaldan.
2. Urur/xisbi kasta oo ka diiwaangashan Puntland, waxaa ka reebban inuu ka hawl-galo meel ka baxsan Puntland.
3. Urur/xisbi kama muuqan karaan xeerarkiisa qodob ama qodobo ka hor imanaya Shareecada Islaamka, Dastuurka iyo qawaaniinta kale ee Puntland.
4. Urur/xisbi kasta waxaa ka reebban inuu dhaqaale ka helo ilo aan sharci ahayn.
5. Urur/xisbi kasta waxaa ka reebban inuu hantida Dawladda si khaldan u adeegsado ama u isticmaalo hawlihiisa u gaarka ah ee urunimo/xisbinimo ama doorashooyinka.
6. Urur/xisbi waxaa ka reebban inuu ku ololeeyo qaab qabiilaysan, Ciidamaysan, taasoo ka hor imaanaysa Dastuurka, mabaadi'da saldhigga u ah dimuqraaddiyadda, hannaanka xisbiyadda badan ama wax-wada lahaanshaha siyaasiga ah.
7. Urur/xisbi kasta waxaa ka reebban inuu hor istaago, carqaladeeyo, qaso, baabi'iyo, ama fara galiyo kulan, isu-soo-bax ama bannaanbax ay samaynayaan taageerayaasha ama hoggaanka Urur/xisbi siyaasadeed kale.
8. Urur/xisbi kasta waxaa ka reebban inuu qaato laaluush, ama oggolaado inuu bixiyo.
9. Haddii Urur/xisbi ku kaco falalka lagu soo sheegay faqradaha sare ee qodobkan ama si kale loogu sheegay xeerkan qodobadiisa kale waxaa ka dhalanaya anshaxmarin, waxaana loo raacayaa go'aanka habraaca anshaxa uu Guddigu Doorashooyinku u dajiyey Ururrada iyo Xisbiyada Siyaasadda.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 22-aad
Xuquuqaha Ururrada/Xisbiyada Siyaasadeed

1. Urur/xisbi kasta wuxuu xaq u leeyahay:
   b. In uu si xor ah uga qayb qaato hawlaha siyaasadeed ee waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka Dawladda Puntland.
   t. In uu ku biiro, la midoobo ama iskaashi siyaasadeed la sameeyo Urur ama Xisbi kale, si waafaqsan Xeerkan iyo Xeer-hoosaadkiisa.
   j. In uu qabsado shirar, kulammo iyo hawlo siyaasadeed oo aan ka hor imaanayn Xeerarka Dawladda Puntland.
   x. In uu soo bandhigo aragtidiisa, barnaamijkiisa iyo siyaasaddiisa.
   Kh. In uu si siman uga qayb galo tartamada doorashooyinka markuu buuxiyo shuruudaha xeerku dhigayo.
2. Xubnaha Ururka ama Xisbigu waxay xuquuq isku mid ah u lee yihiin: -
   b. In ay doortaan loona doorto xilalka Ururka ama Xisbiga, iyadoo loo marayo hannaan xor ah, caddaalad ah oo hufan.
   t. In ay ka qaybgalaan shirarka iyo go'aan-qaadashada sida uu dhigayo xeer hoosaadka.
   j. In ay soo jeediyaan talooyin, cabashooyin iyo aragtiyo la xiriira maamulka ururka ama xisbiga.
   x. In ay helaan xogta iyo warbixinaha muhiimka ah ee la xiriira hawlaha ururka ama xisbiga, si waafaqsan xeer-hoosaadka.
3. Urur ama xisbi kasta iyo xubnihiisu waxay xaq u leeyihiin in si siman loogu ilaaliyo xuquuqdooda siyaasadeed, iyadoo aan lagu samayn takoor ku salaysan qabiil, deegaan, jinsi, naafo, aragti siyaasadeed ama xaalad kale oo uu Xeerku mamnuucayo.

Qodobka 23-aad
Waxyaabaha Xisbi ku Burburi Karo

1. Xisbi siyaasadeed ka diiwaangashan Puntland wuxuu ku burburi karaa haddii ay dhacaan arrimahan soo socda: -
   b. Haddii Xisbigu ku kaco falal lid ku ah Shareecadda Islaamka, Dastuurka iyo shuruucda kale ee Puntland oo horseedi kara burbur, isla markaasna Maxkamad awood u leh go'aan ka gaarto.
   t. Haddii xubnaha Xisbiga ay si rasmi ah u go'aansadaan kala dirista Xisbiga, iyagoo raacaya habraaca ku xusan Dastuurka iyo Xeer-hoosaadka Xisbiga.
   j. Haddii xisbigu ku guuldareysto inuu ka qayb galo laba doorasho oo isku xiga, iyadoo aan jirin cudur daar sharci ah oo la aqbali karo.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

x. Haddii Xisbi siyaasadeed ku guul darraysto qabashada shirarkiisa iyo shaqooyinkiisa ku xusan Xeer-hoosaadkiisa, Guddiga Doorashooyinka ayaa baaritaan ku samaynayaa, haddii Guddigu ku qanco natiijada baaritaanka wuxuu u gudbinayaa Maxkamada awoodda u leh, si ay go'aan uga gaarto.

kh. Haddii Ururku/Xisbigu ku dhaco doorashada kala reebista Ururrada/xisbiyada Siyaasadda.

2. Marka la xaqiijiyo burburka Xisbiga, Guddiga Doorashooyinka Puntland ayaa si rasmi ah uga saari doona liiska xisbiyada diiwaangashan, iyadoo lagu daabacayo Warbaahinta.
3. Hantida xisbiga burburay waxaa loo maamuli doonaa si waafaqsan Dastuurka, Xeerkan iyo Xeer-hoosaadka Xisbiga iyo hannaanka Maaliyadda Dawladda.

Qodobka 24-aad
Warbaahinta Ururrada/Xisbiyada

1. Urur/xisbi Siyaasadeed kasta wuxuu xaq u leeyahay inuu abuuro Warbaahin u gaar ah si waafaqsan Dastuurka iyo Xeerarka kale ee khuseeya warbaahinta gaarka ah.
2. Urur/xisbi Siyaasadeed kasta waxa ka mamnuuc ah in ay faafiyaan, daabacaan ama baahiyaan warar been abuur ah, isla markaana abuuraya kicin iyo iska-hor imaad dadweyne, wiiqaya midnimada dalka, ama waxyeello u gaysanaya nabadgelyada guud.
3. Ururrada/Xisbiyada Siyaasaddu waxay si siman u isticmaalayaan Warbaahinta Dawladda xilliyada ololaha Doorashada.

CUTUBKA 5-AAD
MAALGALINTA IYO XISAABAADKA URURRADA IYO XISBIYADA

Qodobka 25-aad
Hantida Ururka/Xisbiga

1. Hantida Urur/xisbi waxay ka iman kartaa: -
   b. Qaaraanka ay xubnaha Urur/xisbi bixiyaan.
   t. Deeqda la siiyay Ururka/Xisbiga oo ka timid muwaadiniin reer Puntland ah.
   j. Dhaqaale ay ka helaan miisaaniyadda Dawladda.
2. Iyadoo la raacayo Xeer-hoosaadka Ururka/xisbiga waa in sanad kasta Ururka/xisbiga lagu sameeyo Hanti-dhawr madax bannaan.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

3. Ururku/xisbigu wuxuu magacaabayaa Hanti-dhawre madax-bannaan si waafaqsan hannaanka lagu qeexayo Xeer-hoosaadkiisa.
4. Waxaa waajib ah in Hanti-dhawrka ku xusan qodobkan uu yahay shirkad hanti dhawr oo dalka ka diiwaangashan oo ka madax bannaan ururka/xisbiga.
5. Natiijada ka soo baxda hanti dhawrka waa in loo gudbiyo:
   b. Hoggaanka, Golaha Dhexe iyo shirweynaha Ururka/xisbiga.
   t. Guddiga Doorashooyinka.
6. Ururka/Xisbigu waa inuu leeyahay hannaan xisaabeed oo gaar ah isla markaasna daah furan oo si hufan loo xisaabin karo.
7. Dhaqaalaha xukuumaddu siiso xisbi waxaa baaritaan ku samayn kara hanti dhawraha guud.
8. Hanti-dhowrka Guud wuxuu baari karaa haddii loo baahdo hantida Uururka/xisbiga ee ka baxsan dhaqaalaha xukuumaddu siiso.
9. Natiijada uu soo saaro Hanti dhawraha Guud waxaa lagu baahinayaa warbaahinta Dawladda.

Qodobka 26-aad
Waxyaabaha ka Reebban Adeegsiga Deeqaha iyo Hantida Ururka/Xisbiga

Hantida Ururka/xisbiga looma isticmaali karo si toos ah ama si dadban in loogu qorsheeyo samaynta ganacsi gaar loo leeyahay, ha ahaato hanti guurto ama maguurto ahba iyo wax kasta oo ka baxsan danaha Ururka/xisbiga.

Qodobka 27-aad
Qoondada Miisaaniyadeed ee Xisbiyada

Dawladda Puntland waa in ay u samayso xisbiyada hela ruqsadda Xisbinimo miisaaniyad dhaqaale oo bille ah taasoo ku salaysan sida ay u kala helaan tirada codadka guud ee Golayaasha Deegaanka.

Qodobka 28-aad
Xisaab-xirka Ururka/Xisbiga

1. Sannad xisaabeedka Ururrada/xisbiyadu waxay ka bilaabata 1-da Janaayo ilaa 31-da Diseembar sannad kasta.
2. Xisbi kasta wuxuu samaynayaa xisaab-xir sanadeed (Dakhli iyo Kharash) uu soo caddeeyay hanti dhawr madax bannaan, waxaana loo gudbinayaa Guddiga, Doorashooyinka ugu danbayn 1-da Maarso ee sannadka xiga.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

CUTUBKA 6-AAD

XEER-HOOSAADKA URURRADA/XISBIYADA SIYAASADDA

Qodobka 29-aad
Xeer-hoosaadka iyo Qaab-dhismeedka
Ururrada/Xisbiyada Siyaasadda

1. Urur/xisbi kasta waa inuu leeyahay xeer hoosaad uu ansixiyey Shirweynaha ururka/xisbiga
2. Xeer-hoosaadka Ururka/xisbiga waxba kama beddeli karaan cid aan ahayn Shirweyne.
3. Ururka/Xisbigu waa inuu u soo gudbiyo Guddiga Xeer-hoosaadka uu ansixiyey Shirweynuhu oo ay ku saxiixan yihiin shir-guddoonka Shirweynaha muddo saddex (3) beri gudahood ah ka dib maalinta uu dhamaado Shirweynuhu.
4. Iyadoo aan waxba loo dhimayn awoodda shirweynuhu u leeyahay inuu qoro Xeer-hoosaadka Ururrada/xisbiyada siyaasadda waa in ay ku cadyihiin arrimaha soo socda: -
   b. Magaca ururka/xisbiga oo dhammaystiran.
   t. Ujeeddooyinka Ururka/xisbiga.
   J. Qaab-dhismeedka Ururka/xisbiga.
   x. Awoodaha qaybaha kala duwan ee Ururka/xisbiga iyo hogaankiisa.
   kh. Qaabka lagu soo doorto ama lagu beddeli karo iyo muddada xilka ee mas'uuliyiinta Ururka/Xisbiga.
   d. Shuruudaha Xubinta lagu noqon karo, sababta lagu waayi karo iyo is-casilaadda Xubinta.
   r. Qodobbo khuseeya sida Xeer-hoosaadka Ururka wax looga beddeli karo.
5. Xeer-hoosaadka Ururka/xisbigu waa inuu si cad u qeexaa habraaca lagu xallinayo khilaafaadka ka dhex dhasha xubnaha ama hoggaanka Ururka/xisbiga, isla markaana mudnaanta siiyaa xallinta khilaafaadka gudaha ururka/xisbiga ka hor inta aan loo gudbin hay'ad kale oo awoodda u leh.

Qodobka 30-aad
Shirweynaha Ururrada/Xisbiyada

1. Ururka/xisbigu waa inuu ku qabsado shirweynaha caadiga ah sida ugu qoran Xeer-hoosaadkiisa.
2. Xubnaha ergada ka qaybgalaysa shirweynaha waa inay yihiin xubno diiwaangashan oo ka mid ah Ururka/xisbiga oo ku jira diiwaanka xubinnimada ee uu hayo Guddiga Doorashooyinku.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

3. Xisbiyada haysta ruqsadda xisbinimo markay qabanayaan shirweyne waa inay Guddiga usoo gudbiyaan magacyada xubnaha ergada ah ugu dambayn shan iyo toban (15) maalmood ka hor maalinta shirweynuhu dhacayo si Guddigu u hubiyo inay yihiin xubnaha diiwaangashan ee xisbigu leeyahay.
4. Guddigu wuxuu goob joog ka noqonayaa habsami socodka shirweynaha si uu u hubiyo inuu u dhacay si dimuqraadi ah oo daah-furan.
5. Waxaa waajib ah in shirweynuhu codkiisa ku dhiibto codbixin qarsoodi ama gacan taag ah marka uu dooranayo hoggaanka Ururka/xisbiga.
6. Shirweynaha aan caadiga ahayn ee Ururka/xisbiga waxaa soo jeedin kara Guddoomiyaha Ururka/xisbiga ama saddex meelood meel (1/3) ee xubnaha Golaha Dhexe.
7. Hannaanka loo marayo shirweynaha aan caadiga ahayn wuxuu la mid yahay shirweynaha caadiga ah.
8. Waxaa waajib ah in ergooyinka shirweynuhu ay ka yimaadan Gobollada iyo Degmooyinka Puntland iyo laamaha dibadda.
9. Guddigu waxay dejinayaan Xeer-nidaamiyayaal iyo hagayaal lagu maamulayo shirweynahooda.

Qodobka 31-aad
Shirarka Golaha Dhexe ee Ururrada/Xisbiyada

1. Ururku/Xisbigu waa inuu yeesho shirka Golaha Dhexe ee caadiga ah si waafaqsan Xeer-hoosaadkooda.
2. Shirka golaha dhexe ee Ururka/xisbiga waxaa ka qayb-geli kara oo keliya xubnaha Golaha Dhexe ee lagu doortay shirweynihii u dambeeyey ee Ururka/xisbiga ee Guddiga Doorashooyinku haysto magacyadooda.
3. Guddiga waxaa waajib ku ah inuu hubiyo in xubnaha ka qaybgelaya shirka Golaha Dhexe ay yihiin kuwa uu hayo xogtooda.
4. Waxaa reebban inuu ka qaybgalo shirka Golaha Dhexe cid aan ku jirin Golaha marka laga reebo xubnaha goob joogga ah oo aan lahayn cod.
5. Xeer-hoosaadka ururka/xisbiga waa in lagu caddeeyo cidda iskugu yeeri karta shirka aan caadiga ahayn ee Golaha Dhexe.
6. Hannaanka loo marayo shirka Golaha Dhexe ee aan caadiga ahayn wuxuu la mid yahay shirka Golaha Dhexe ee caadiga ah.
7. Xubinta Golaha Dhexe ee loo diido inuu ka qaybgalo shirka Golaha Dhexe, wuxuu cabashadiisa u gudbinayaa Guddiga doorashooyinka.
8. Xubinta aan ka mid ahayn ee ka qaybgasha Shirka Golaha Dhexe waxaa tallaabo sharciga waafaqsan ka qaadayaa Guddiga doorashooyinka.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR
المحامي العام للدولة

Qodobka 32-aad
Hoggaanka Urur/xisbi Siyaasadeed

1. Iyadoo aan waxba loo dhimayn shuruudaha gaarka ah ee ku xusan xeer hoosaadka Ururka/xisbiga, qofka isu sharraxaya hoggaanka Urur/xisbi Siyaasadeed waa in uu buuxiyo shuruudahan: -
   b. Waa inuu yahay muwaaddin soomaaliyeed oo reer Puntland ah, muslim ah kuna dhaqma diinta islaamka maskax ahaanna fiyow.
   t. Waa inuu xubin ka yahay Ururka/xisbiga ayna si joogto ah u bixin jirtay qaaraanka Ururka/xisbiga ee sanadlaha ah.
   j. Waa in da'diisu ka yarayn 35 jir, marka laga reebo musharaxa madaxweynaha iyo Madaxweyne Ku-xigeen oo loo raacayo sida uu qabo Dastuurka.
   x. Waa in aanu ku dhicin xukun maxkamadeed oo ah fal-dambiyeed uu gaystay oo ka badan saddex (3) sanno 5tii sanno ee u dambaysay.

Qodobka 33-aad
Isbeddelka Hoggaanka iyo Shuruucda Ururka/Xisbiga

1. Isbeddel kasta oo lagu sameeyo hoggaanka, Shuruucda iyo Qaab-dhismeedka Ururka/Xisbiga waa in laga sheego warbaahinta ugu badnaan shan iyo toban (15) maalmood gudohood markuu Ururka/xisbigu qabsado shirka uu ku gaaray go'aanka isbeddelkaas.
2. Waa in qoraal rasmi ah oo ku saabsan arrinta ku xusan farqadda 1-aad loo diro Guddiga Doorashooyinka muddo shan iyo toban (15) maalmood gudahood.

Qodobka 34-aad
Barnaamijka Siyaasadeed ee Ururka/Xisbiga

1. Ururku/Xisbigu waa inuu leeyahay barnaamij siyaasadeed oo faah-faahsan, kaasoo ku dhisan aragtida Ururka/xisbigu leeyahay.
2. Barnaamijka siyaasadeed waa in Ururka/xisbigu faafiyo oo ka dhigo mid ay heli karaan dadweynuhu.

GARYAQAANKA GUUD EE DOWLADDA PUNTLAND
STATE GENERAL SOLICITOR

Qodobka 35-aad
Astaamaha iyo Magacyada

1. Ururka/xisbigu waa inuu leeyahay magac iyo astaan u gaar ah oo ka duwan mida Ururrada/xisbiyada kale.
2. Waxaa reebban in magaca Urur/xisbi uu noqdo mid ku salaysan qabiil, gobol gaar ah ama xambaarsan sifooyin khilaafsan diinta ama wax u dhimi kara wadajirka iyo midnimada shacabka ama mid sita magaca Hay'adaha Dawladda.

CUTUBKA 7-AAD
XALLINTA KHILAAFAADKA

Qodobka 36-aad
Xallinta Khilaafaadka

1. Guddiga Doorashooyinka wuxuu awood u leeyahay ka gar-naqidda cabashooyinka ka soo baxa Urur/xisbi dhexdiisa.
2. Dhinaca dacwadda qaba wuxuu dacwaddiisa u qoranayaa oo u gudbinayaa Guddiga Doorashooyinka isaga oo si cad u tilmaamaaya wuxuu ka cabanayo nuxur ahaan, qodobada sharci ee cabashadu ku salaysan tahay.
3. Guddiga Doorashooyinku markuu helo dacwadda ku xusan farqadda 2-aad ee Qodobkan, wuxuu gaarsiinayaa dhinaca kale qoraalka dacwadda, iyadoo la siinaayo dhinaca laga cabanayo inuu kaga soo jawaabo todoba (7) maalmood gudohood.
4. Guddigu markuu helo jawaab celinta dhinaca la dacweeyey waa inuu muddeeyo xilliga uu dhageysanayo dood afeedka dhinacyada.
5. Markuu Guddigu dhegaysto dhinacyada wuxuu ka soo saarayaa go'aan ku salaysan Xeerkan iyo xeer hoosaadka ururrada/xisbiyada dacwaddu ku saabsan tahay.
6. Go'aanka Guddiga ee ku xusan faqradda 5-aad ee qodobkan waa inuu qoran yahay, uu tilmaamo asbaabaha lagu saleeyey, qodobada sharci ee guddigu u cuskaday iyo caddaymaha ay raaceen.
7. Guddigu waa inuu go'aankiisa ku soo saaro ugu badnaan afar iyo toban (14) maalmood gudohood marka ay dhegaysiga u dambeeya uu qaado.
8. Dhinicii ku qanci waaya go'aanka Guddiga Doorashooyinka waxaa u bannaan inuu cabashadiisa u gudbiyo Maxkamadda Sare soddon (30) maalmood gudohood.
9. Maxkamadda Sare ayaa go'aaminaysa habka dhegeysiga dacwadda, iyadoo raacaysa hannaanka gar-qaadista dacwadaha Maamulka.

10. Xukunka Maxkamadda Sare waa mid kama dambays ah.
11. Haddii khilaafka farqadaha hore ku qoran yimaado inta aan ururka la diiwaangelin ee aan aqoonsiga la siin, Guddiga doorashooyinku ma diiwaangelinayo ururka khilaafku ka jiro.

Qodobka 37-aad
Habraaca iyo Ganaaxyada Xeerka

1. Guddigu wuxuu qaadi karaa mid ama in ka badan tallaabooyinka ganaax-maamul ee soo socda: -
   b. Digniin qoraal ah.
   t. Amar lagu saxayo xadgudubka muddo cayiman gudaheed.
   j. Hakinta ku-meel-gaarka ah ee qaar ka mid ah xuquuqaha ama hawlaha ururka/xisbiga ilaa laga saxo xadgudubka.
   x. Hakinta ama laalidda diiwaangelinta ururka/xisbiga haddii xadgudubku yahay mid culus ama soo noqnoqdo.
2. Ka hor inta aan la soo rogin ganaax ama tallaabo maamul, Guddigu waa inuu siiyo ururka/xisbiga ogeysiis qoraal ah oo qeexaya xadgudubka lagu eedaynayo, isla markaana fursad uu isku difaaco ku siiyo muddo aan ka yarayn toddoba (7) maalmood.
3. Guddigu markuu go'aansado in tallaabooyinka ku xusan farqadda (1-aad) aysan ku filnayn ama xadgudubku yahay mid culus ama soo noqnoqday, waxay ku soo rogi karaan ururka/xisbiga ganaax lacageed oo u dhexeeya $1,000 (Kun Doollar) ilaa $10,000 (Toban Kun oo Doollar), ama shilin soomaali u dhigma, iyadoo lagu salaynayo nooca, culayska iyo soo noqnoqoshada xadgudubka.
4. Go'aanka Guddigu waa inuu noqdaa mid qoraal ah oo ay ku cad yihiin qodobada xeerka ama tallaabada maamul ee lagu saleeyey ganaaxa.
5. Urur/xisbi kasta oo aan ku qanacsanayn go'aanka Guddiga wuxuu racfaan uga qaadan karaa maxkamadda awoodda u leh muddo soddon (30) maalmood gudahood laga bilaabo taariikhda lagu wargeliyey go'aanka.

Qodobka 38-aad
Xeer-nidaamiyeyaal

Guddiga Doorashooyinku wuxuu soo saari karaa Xeer-nidaamiyeyaal lagama maarmaan u ah hirgelinta xeerkan, iyadoo aanay ka hor imanayn qodobbadiisa.

Qodobka 39-aad
Burin

1. Waxaa la buriyey wixii xeer ama qawaaniin kale ah oo ka hor imaanaya ama aan la socon karin Xeerkan.
2. Wixii laga waayo Xeerkan waxaa loogu noqonayaa Dastuurka iyo Xeerarka kale ee Dawladda Puntland.

Qodobka 40-aad
Dhaqan-galka Xeerka

Xeerkani wuxuu dhaqan-gelayaa marka Golaha Wakiilladu ansixiyo, Madaxweynaha Dawladda Puntland saxiixo, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah Dawladda Puntland.